Dacwada qaxootinimada dheer

Maxaa laguu siinayaa warbixintaan?
Magangelyo ayaad Nederland ka codsatey. Ha'ayada socdaalka iyo jinsiyadaha IND ayaa eegaya in adiga sharuudaha sharci qaxootinimo aad buuxisey iyo in kale. Dacwada guud ee magangelyada waxay soconeysaa sideed maalmood. Adiga dacwadaada waxay IND u baahantahay waqti dheer si ay baaritaan u sameeyaan. Sidaa daraadeed ayay IND dacwadaada sida kuwa mudada dheer ugu howlgalaysaa. Warbixintaan ayaad ka akhrisan kartaa waxa dhacayaa inta dacwada qaxootinimada ee dheer lagu jiro.

Dacwada qaxootinimada

Waxaad mar hore IND la yeelatey wareysi ku saabsan qofka aad tahay iyo wadadii aad ku timid. Waxaa laga yaabaa oo kale inaad wareysiga labaad la yeelatey IND oo ku saabsan sababihii kuugu kalifey in aad wadankaaga hooyo ka soo tagto. Haddii IND su' aalo kale aanay rabin in ay ku warsadaan, markaa inta lagu jiro dacwada baaritaanka dheer uma baahnid in aad xafiiska IND timaado. Haddiise aanaan weli IND wareysiga labaad kula yeelan ama ay IND weli rabto in ay su' aalo kale ku weydiyaan, markaa wey kula soo xiriirayaan si ay wareysi dhameystir ah kula yeeshaan. Sidoo kale inta dacwada baaritaanka dheer lagu jiro waxaad yeelanaysaa looyar ku caawina oo aan lacag lagaa rabin. Waa la ogol yahay in jawaabta dacwadaada aad ku sugto Nederland. Inta taa laga gaarayana waxaad joogeysaa xeroyinka COA. Ma laguu gudbiyay Dacwadda Magangelyo oo Dheer? Waxaad malaha u guureysa rug kale oo dejjinta.

Go' aan lagu tala jiro

Lix bilood gudahood ayaad warqad IND ka heleysaa oo ku saabsan waxii ka soo baxay baaritaanka dacwadaada. Laba midkood ayay noqon kartaa:

1. Waad soo buuxisey sharuudihii lagu ogolaanayey sharciga qaxootinimada. Waxaad heleysaa (la soo marin looyarkaaga) warqad kaaga timid IND (= go' aanka) oo ay ku qoran yihiin in codsigaagii magangelyada ahaa la ogolaadey. Waa laguu ogol yahay (si ku meel gaar ah) in aad Nederland ku noolaato. Looyarkaaga ayaa ku sharxaya saameynta uu go' aankasi kuugu yeelanayo.
2. IND waxay u arkaan in aadan soo buuxin sharuudihii lagu ogolaanayey sharciga qaxootinimada. Warqada IND ay kuu soo dirto waxaa ku qoran in IND ku tala jirto codsigaagii magangelyada ahaa in ay diido. Taasi waa qoraalka mowqifkaada. Warqadaasi waxaa kaloo ku qoran sababaha lagu gaarey go'aankaasi hore u dhac ah iyo saameynta uu kuugu yeelan karo. Looyarkaaga ayaa kaala hadlaya warqadaasi.

Aragtida ku aadan (Zienswijze)

Haddii IND qorshaheedu yahay in ay diido codsigaaga magangelyada ah, waxaad taasi kala tashaneysaa looyarkaaga. Looyarkaa waxaa uu markaa ka dib IND u dirayaa jawaab qoraal ah. Taasi waa qoraalka aragtida ku aadan. Taasi waa warqad si rasmi ah aad ugu jawaabeysid sida ay IND ku tala jirto kuna sheegi kartaan sababta aydan ugu racsaneyn diidmada ay ku tala jiraan.

Go' aanka

IND keddib marka ay akhriyaan aragtidaada dib ayay qiimeyneysa in go' aankii lagu tala jirey ay tahay in wax laga bedelo iyo in kale. Waxaa ka soo baxa qiimeyntaasi ayay ku xiran tahay sida ay dacwaada u sii soconayso. IND warqad ayay looyarkaag ugu soo gudbineysaa waxa ka soo baxa qiimeyntaasi. Looyarkaaga ayaa kuu sharxaya saameynta ay kuugu yeelanayso go' aankaasi. Laba midkood ayay noqon kartaa:

1. Ka dib marka la akhriyo mowqifkiina ay IND la noqotey in aad soo buuxisey sharuudihii lagu ogolaanayey sharciga qaxootinimada. Waxaad IND ka heleysaa (la soo marin looyarkaaga) warqad (= go' aan) oo ay ku qoran tahay in la ogolaadey codsigaaga magangelyada ah. Waad ku noolaan kartaa (si ku meel gaar ah) Nederland. Looyarkaaga yaa kuu sharxaya saameynta tani ay kuu yeelan karto.
2. IND waxay weli qabtaa in adiga aadan soo buuxin sharuudaha lagu ogolaanayey sharciga qaxootinimada. Waxaad IND ka heleysaa (la soo marin looyarkaaga) warqad (= go' aan) oo ay ku qoran tahay in la diidey codsigaaga magangelyada ah. Warqadaasi waxaa la socda oo lagu siinayaa warbixin gooni ah oo ku saabsan saameenta ay diidmada leeedahay, iyo maxaad kaga hor tegi kartaa iyo fursadaha dib u noqosho. Go'aankaasi waxaa kaloo ku qoran sababaha lagu gaarey go' aankaasi iyo saameynta uu kuugu yeelanayo. Looyarkaaga ayaa kaala hadlaya go'aankaasi.

Dacwada qaxootinimada ka dib.

Haddii IND ay codsigaaga magangelyada ah ogolaato, waad ku noolaan kartaa (si ku meel gaar ah) Nederland. Waxaad heleysaa sharci degenaansho ah, waad shaqeyn kartaa iyo dad qoyskaaga ka mid ah haddii ay jiraan waa la ogol yahay in laguu keeno. Intaa waxaa dheer in COA ay kaa caawini doonto helitanka guri aad ku noolaato. Wadahadal aad la yeelato COA ayaa macluumaad muhiim u ah guri sidii aad u heli lahayd lagu soo qaadanayaa. Markaa ka dib ayaa gameeti laguu xiriirinayaa. Ka dib ayay gameetida kuu raadinaysaa guri munaasab kuugu ah. Mar keli ah ayaa laguu soo bandhigayaa guri waana in aad ogolaato. Inta aad ka heleyso guri kuu gaar ah, waa la ogol yahay in aad ku noolaato xerooyinka COA . IND ayaa kuugu wargelineyso xuquuqda aad leedahay, oo ay ka mid yihiin keenista dadka qoyskaaga ah ee aad ka soo tagtey, iyo waajibadka ku saran ka dib marka la ogolaado codsigaagii magangelyada ah. Shaqaalaha ururka gargaarka qoxootiga (VWN) waxay kaa caawini karaan sidii aad mujtamaca Nederland u dhex geli lahayd iyo howsha keenista qoska kaa maqan. Waxay kaa caawinayaan sidii aad ku heli lahayd hay'ado kale duwan, tusaale sidii aad ku heli lahayd guri, iyo waxbarasho ama shaqo.

Haddii IND ay codsigaaga magangelyada ah diido, waxaad yeeli kartaa adigoo la tashanaya looyarkaaga in aad ka dacwooto go'aankaasi oo aad kaga dacwooto garsoore Nederland ah. Taa macnaheedu waa in aad si rasmi ah ugu gudbineyso garsooraha in aadan ku raacsaneyn go'aanka IND. Garsooraha ayaa markaa baaritaan sameenaya in ay IND sharciga Nederland u raacdey markii ay go'aanka ka gaarayeen codsigaaga magangelyada ah. Xaaladaha qaarkood go' aanka garsooraha waad sugi kartaa. Xaaladaha kale waxaad garsooraha weydiin kartaa in waqtiga ay socoto dacwadaada aad weli sii joogi kartid Nederland. Looyarkaaga yaa arimahaasi kaa cawinaya.

Haddii IND codsigaaga magangelyada ah diido, waxaa sida badan lagu geenayaa xero qoxooti. Halkaas ayaad isugu diyaarineysaa dib ugu noqoshada wadanka aad asal ahaan ka timid. Go' aanka IND waxaa ku qoran waqtiga gudahiisa ay tahay in aad uga baxdo wadanka. Inta badan taasi waa 28 maalmood. Marka uu dhamaado waqtigaa laguu qabtey ka dib ma jirto xaq dambe oo aad hooy u leedahay. Laguuma ogola in aad sii joogto xerada qoxootiga.

Adiga ayaa ka masuul ah dib ugu noqoshada wadanka aad asal ahaan ka timid. Haddii aadan waqtiga laguu qabtey gudahiis uga bixin wadanka, marka si khasab ayaa wadankii asal ahaan ka timid laguugu celin karaa.

INTERNATIONAL ORGANIZATION FOR MIGRATION
IOM·OIM
THE UNITED NATIONS MIGRATION AGENCY

IOM Internationale Organisatie voor Migratie (Ururka Caalemiga ah ee HIjrada). Haddii si iskaa ah aad u rabtid in aad dib ugu noqotid wadankii aad asal ahaan ka timid, waxaad la xiriiri kartaa markaa ururka caalemiga ah ee hIjrada (IOM). Hay'adaasi ayaa ku siin kara macluumaad fiican kaana caawini bixitaanka. Sida badan waxaa ay IMO leeyihiin waqti qaabilaad oo xereda dhexdeeda ah.

Dienst Terugkeer en Vertrek
Ministerie van Veiligheid en Justitie

Dienst Terugkeer en Vertrek (DT&V) (hay'ada dib u celinta & bixitaanka). Wasaarada cadaalada iyo amniga. Hay'ada dib u celinta iyo bixitaanka (DT&V) ee wasaarada cadaalada iyo amniga ayaa kaa caawinaya diyaarinta bixitaanka. Haddii IND ay codsigaaga diido, waxaad heleysaa buuga gaar ah oo ay ku qoran yihiin macluumaad ku saabsan dib ugu noqoshada wadankii aad ka timid.

Xataa ka dib dacwadaada qoxootinimada waxaad ururka gargaarka qoxootiga VWN kala xiriiri kartaa xaga taagerida iyo macluumaadka.

Ka hawl galka macluumaadka shaqsiga

Macluumaadka shaqsiga waa warbixinno kala duwan oo adiga kuugu saabsan. Hey'adaha oo buuggan warbixinta ka wada shaqeeyay waxa ay ku xusan yihiin xagga hoose. Hey'adahaan waxa ay ka hawl galaan macluumaadka shaqsiga inta uu socoto codsigaada magangelyo, weydiisigaada ama is xaadirintaada. Iyaga ayaa ku weydiinaayo macluumaadkaada iyo hey'ado kale iyo dad kale haddii loo baahdo. Hey'adahaan waa ay isticmaalaan waana ay keydiyaan macluumaadkaada waxa ayna u gudbiyaan hey'ado kale haddii ay taasi sharciga waafaqsan tahay. Sharcibixinta xogta shaqsiga waxaa ku yaal waajibaadka hey'adaha ka hawl galo macluumaadkaada. Waa in ay tusaale ahaan, si taxadder leh oo amaankeeda sugan yahay u adeegsadaan macluumaadkaada. Sharcibixinta xogta shaqsiga waxaa kaloo ku yaal xuquuqdaada, tusaale ahaan:

- in aad aragto ogaatana macluumaadkaada hey'adaha la yaal;
- in aad ogaato waxa ay hey'adaha ku sameyaan macluumaadkaada iyo sababta;
- in aad ogaato hey'adahee loo gudbiyay macluumaadkaada.

Ma dooneysaa in aad dheeraad ka ogaato ka hawl galka macluumaadkaada shaqsiga iyo xuquuqdaada? Markaa eeg websiteyada hey'adaha. Xagga hoose ee buuggan warbixinta ka akhriso ciwaannada websiteyada.

Su' aalaha inta badan laysweydiiyo

Maxaa dhacaya hadaadan tegin wareysiga IND?
Waaxaa dhici kara in balanta IND aadan iman karin. Waa in aad markaa sabab muhiim ah u heshaa. Adigoo soo maraya looyarkaaga ayaad IND sidaasi ku wargelineysaa. Haddii IND u aragto in sabab fiican darteed aad ku maqneyd, balan cusub ayaa laguu sameenayaa. Haddii aad sabab aan sharci ahayn darteed balanta IND aad la lahayd kaga maqnaatey, taasi waxay saameyn ku yeelan kartaa codsigaaga magangelyada ah.

Meeqa ayuu qaadanayaa baaritaanka IND?
IND waa ku khasab in ay go'aan ku gaarto lix bilood gudahood ka dib marka aad soo gudbiso codsiga magangelyada ah. Mararka qaarkood IND waa loo ogol yahay inay dheereysato waqtigaasi si ay baaritaan badan u sameyso. Haddii aanay IND lix bilood gudahood go'aan aanay ku gaari karin waxaad markaa IND ka heleysaa wargelin arinkan ku saabsan. Haddii aanay weli go'aan gaarin IND lix bilood ka dib marka aad codsiga magangelyada ah soo gudbisey isla markaasi aaney IND wax wargelin ah ka helin? Markaa warqad qoraal ah ayaad ku warsan kartaa IND in laba usbuuc gudahood codsigaaga magangelyada ah go'aan kaga gaaraan. Looyarkaaga yaa arimahan kaa caawini kara. Codsi looyar uu gudbiyo dartii ayuu garsooraha markaa ka dib go'aamin karaa in IND ganaax bixiso maalin kasta oo aaney go'aan ka gaarin codsigaaga.

Ma qabtaa weli su'aalo ka dib marka aad akhriso warbixintaan?
Waxaad su'aalahaas weydiin kartaa looyarkaaga ama qof ka mid ah shaqaalaha COA , IND ama ururka gargaarka qoxootiga VWN.

Ma qabtaa wax cabasho ah?
Dhamaan hay'adaha ka howlgala dacwadaha qoxootinimada, waxay hooshooda u gutaan si xirfad iyo taxadar leh. Haddii aad u aragto in hay'ad aaney si fiican kula dhaqmin, markaa waad ka dacwoon kartaa. Looyarkaaga ama shaqaale ka mid ah kuwa ururka gargaarka qoxootiga (VWN) ayaa kaa caawini arinkan.

Daabacadan waxaa si wada jir ah u soo saaray:
Xaruunta dhexe ee qaxootiga (COA) I www.coa.nl
Hayáda dib u celinta iyo bixitanka (DT&V) I www.dienstterugkeerenvertrek.nl
Hay'ada socdaalka iyo jinsiyadaha (IND) I www.Ind.nl
Golaha gargaarka xaquuqda sharciga (RvR) I www.rvr.nl
Ururka gargaarka qaxootiga Nederland I www.vluchtelingenwerk.nl

Oo ka wakil ah:
Wasaarada cadaalada iyo amniga, qeybta siyaasada hijrada www.rijksoverheid.nl

Daabacadan waxa ku qoran xuquuq kuma sheegan kartid. Haddii turjumida ay keento fasiraad kala duwan waxaa la raacayaa kan afka Nederlaanka ah.